

Qaabilaaddaha Qiimaynta Ardayda Barata Luuqadda Ingiriiska ee Dib loo Eegay.

Waxa muhiim ah in dhammaan ardayda Ohio ay helaan fursad isku mid ah si ay u helaan shahaadada dugsiga sare iyo taageerooyinka loo baahan yahay si ay u gaadhaan hadafkan (yoolkan). Waaxda Waxbarashada Ohio (Waaxda) waxa ka go'an inay taageerooyinkan siiso ardayda Ingiriiska barata ee ka soo jeedda dadka tirada yar. Ohio waxay siisaa ardayda Ingiriiska barata qaabab badan oo ay si macne leh uga qaybgali karaan una muujin karaan aqoonta ay u leeyihiin wixa loo dhigayo. Markuu sidaas yeelayo, gobolku wuxuu bixiyaa qaabilaado cayiman oo ku aaddan imtixaanada gobolka, gaar ahaan kuwa aan la qaadayn imtixaanka aqoonta luuqadda Ingiriiska.

Waaxdu waxay si joogto ah uga fekeraysaa inay hagaajiso taageerada ay siiso ardayda. Markii ay dib-u-eegtay qaabilaadaha qaadista imtixaanka, Waaxdu waxay wax ka beddeshay Buuggeeda Helitaanada, Buugga Xeerarka Imtixaanka Gobolka Ohio iyo Buugga Qaadista Imtixaanada Qalinjabinta Ohio (OGT). Waxyaalaha la soo kordhiyey waxay hubin doonaan in ardayda Ingiriiska barataa ay muujin karaan aqoontooda imtixaanada gobolka oo loo yeelay qaabilaado loogu talogalay inay yareeyaan caqabadaha luuqadda ayna kordhiyaan halitaanka.

Dhammaan ardayda Ingiriiska barata waxay heli karaan wakhti dheeraad ah, waxayna isticmaali karaan qaamuuska tarjumaadda eray-ka-erayga ah inta lagu jiro dhammaan imtixaannada. Sidoo kale, tarjumaadda hadalka ah ee Imtixaanada Gobolka Ohio waa la oggol yahay. Dhammaan qaybaha OGT waxa dhici karta in la tarjumo marka laga reebo akhriska qoraalada iyo jawaabaha imtixaanka qoraalka, kuwaasi oo lagu qiimeeyo sida ardaydu luuqadda Ingiriiska ku yihiin. [Buugga Helitaanka ee Ohio](#) wuxuu sharaxaa qaabilaadaha la heli karo oo faahfaahsan. Qaabilaadahan laguma go'aamiyo wakhtiga uu qofku ka diiwaangashan yahay dugsiyada Maraykanka ama inta sano ee ardaygu ahaa mid baranaya Ingiriiska. Waxyaalaha la soo kordhiyey waxa kamid ah fursad ardayda mutaysatay ay dib ugu gali karaan OGT, sida hoos ku cad.

Dib-u-galista Imtixaanada Qalinjabinta Ohio Hadda Waa la Helayaa

Waaxdu waxay ku dhawaaqaysaa fursad ay dib loogu galo Imtixaanada Qalinjabinta Ohio (OGT). Shakhxiyaadka ku jiray fasalka 9aad kahor Julaay 1, 2014, oo ay kujiraan ardayda Ingiriiska barataa, way heli karaan. Kuwa danaynayaan waxay iska diiwaangalin karaan degmo dugsiyeedyada dadwaynaha Ohio, dugsiyada bulshada, dugsiyada la aqoonsan yahay ee ka qaybqaadanaya oo aan ahayn kuwa dadwaynaha ama dadka da'da 22 ka weyn ee ku jira barnaamij shahaado dugsi sare. Diiwaanka dugsiyada waxa laga [heli karaa halkan](#).

OGT waxa la heli karaa ilaa Juun 2022. Dadka imtixaanka galayaa waxay haystaan ilaa saddex fursadood oo ay gali karaan sanadkii. Muddada qaadista imtixaanka OGT ee barta internetka Ohio waxay furan tahay Sibtambar ilaa Julaay, iyadoo wakhtiga qaadista imtixaanka ee ugu dambeeyaa uu dhammaanayo Juun 30, 2022. Taariikhaha imtixaanku waa ku kala duwan yihiin goobaha. Qaabilaadaha waraaqaha ayaa la heli karaa wakhtiyada imtixaanka ee dayrta, guga iyo xagaaga. Ardayda Ingiriiska barata ee imtixaanka galaysaa waxay heli doonaan qaabilaado kusalaysan heerkooda aqoonta luuqadda. Fadlan booqo websaytka [Imtixaanka Qalijabinta Ohio](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Kala xidhiidh Xafiiska Qiimaynta statetests@education.ohio.gov ama (614) 466-1317 wixii su'aalo aad qabto.

